



SOUTHWEST STATE OF SOMALIA
MINISTRY OF INTERNAL SECURITY
OFFICE OF THE MINISTER

TIX: DGKS/WAG/0055/26

TR: 30/05/2026

War-saxaafadeed degdeg ah

Wasaaradda amniga gudaha ee maamulka Koonfur Galbeed Soomaaliya ayaa war ka soo saartay howlgallada lagu xaqiijinayo amniga ee lagu qaadayo maleeshiyaadka loo yaqaano Salbalaar 2, ee ka howlgala deegaanada maamulkaasi.

Ciidamadan ayaa la keenay degmooyin dhowr ah oo ay ku jirto Baydhabo, kuwaasoo laga keenay deegaano kale oo ka baxsan Koonfur Galbeed ee xumadii hore ee waqtigeeda dhamaday ee Federaalka. Howlgallada amniga looga saarayo ciidamadan ayaa soo bilaawday labo bilood ka hor, waxaana hadda la galay wajiyaddi ugu dambeeyay, iyadoo ujeedka uu yahay in si buuxda loo soo celiyo maamulka iyo kala dambeynta dowlad goboleedka Koonfur Galbeed.

Howlgallo maanta laga sameeyay magaalada Baydhabo ayaa laga gaaray ujeedadii laga lahaa, waxaana taasi keentay in jab weyn uu ka soo gaaray maleeshiyaatka Madaxweynihii hore ee Soomaaliya Mudane Hassan Sheikh Mohamud. Waxaa weli socda dadaallada amniga lagu sugayo, howlgalladuna waa ay sii socon doonaan ilaa dhammaan kuwa hubaysan ee aan sharciga ahayn laga saarayo dhamaan degmooyin ka iyo Gobollada Maamulka Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Wasaaraddu waxay u mahadcelinaysaa shacabka Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed gaar ahaan dadka deggan Baydhabo kuwaaso markasta garab taagan, wada shaqaynta joogtada ahna la leh Maamulka Koonfur Galbeed.

Kooxda Salbalaar 2 ayaa lagu eedeeyaa in ay gabood fallo xooggan ku hayaan dadka rayidka ah oo ay ka mid yihiin, dhac hubaysan, baad, caga jugleyn iyo dhac, kuwaas oo sabab u noqday xasillooni darro iyo dhibaato soo wajahday bulshada dhibaataysan.

Laamaha ammaanka ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed ayaa ku dedaalaya soo celinta nabadda, xasiloona, iyo sareynta sharciga.

Wasaaraddu waxay shacabka u xaqiijinaysaa in la qaadi doono dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si wax looga qabto caqabadahaas loona ilaaliyo xuquuqda iyo badbaadada muwaadiniinta.

Waxaa soo saaray:

Mudane. Xassan Cabdulqadir Maxamed

Wasiirka Amniga Gudaha

Dowlad Goboleedka

